# Warqda natiijada Deeqaha Maalgelinta Baahiyaha culus qaybta Xannaanada Ilmaha ee DCYF

Ujeedada Buundooyinka Dhibcaha waa in la caawiyo bixiyeyaasha iyo kuwa keenaya deeqaha inay fahmaan heerka macluumaadka ay DCYF filayso inay ku aragto codsiga deeqda. Jawaabaha codsadaha waxaa lagu saleyn doonaa sharuudaha warqada natiijaada hoose. Qayb kasta oo kharash ah waxay leedahay saddex su'aalood oo dhibcaha ah (A, B, C). Mid walba waxaa lagu qiimeeya ilaa shan dhibcood. Dhibcaha qayb kasta oo kharash ah ayaa la isku geyn doonaa (ilaa 15 dhibcood).

Bixiyeyaasha codsada maalgelinta qaybo badan ayaa la isku celcelin doonaa qaybtooda waxayna heli doonaan hal buundo. Tusaale ahaan, haddii bixiyaha uu codsado lacagaha lagu daro xubnaha shaqaalaha, hagaajinta xarunta, iyo adeegyada daweynta oo wadarta xisaabta noqato 9, 15, iyo 3, kaliya celceliska guud ayaa la xisaabiyaa kaas oo ah 9. Bixiyeyaasha u codsanaya maalgelinta meelo badan lagama hormarin doono bixiyeyaasha maalgelinta u codsanaya hal meel.

Bixiyeyaasha ku sugan meelaha ay ku yar yihiin daryeelka carruurta * waxay heli doonaan 5 dhibcood oo gunno ah wadarta guud ee dhibcaha. Bixiyeyaasha u adeegaya ama ku nool meelaha Bulshooyinka la takooro, oo dakhligoodu yar yahay * waxay heli doonaan 5 dhibcood oo gunno ah wadarta guud ee dhibcaha.

*Qeexitaannadan waxaa soo saaray Xafiiska Hal-abuurka, Is-waafajinta, iyo La Xisaabtanka ee DCYF (OIAA) ee Dayrta 2021 ee Deeqaha Xasilinta Xannaanada Carruurta. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa halkan: https://www.dcyf.wa.gov/practice/oiaa/reports/early-learning-dashboards/child-care-stabilization

Bixiyeyaasha waa inay lahaadaan celcelis ahaan dhibco ah 9 ama ka badan (kahor dhibcaha gunnada) codsigooda si ay ugu gudbaan marxaladda kala-mudnaansiinta.

Qoraalkani waxa uu u adeegaa sidii qalab lagu caawinayo kala soocida codsiyada deeqda laakiin waa hal arin oo kaliya oo lagu go'aaminayo sida lacagaha deeqda loo qaybin doono. DCYF waxay ururin doontaa xogta ka dib marka dhammaan codsiyada la helo waxayna isticmaali doontaa xogtaas si ay u go'aamiso sida ugu wanaagsan ee loo maalgeliyo codsiyada.

# Warqda natiijada Deeqaha Maalgelinta Baahiyaha culus qaybta Xannaanada Ilmaha ee DCYF

| Dhibco | 0 dhibcood | 1 dhibic | 3 dhibcood | 5 dhibcood | |
|---|---|---|---|---|---|
| **Jawaabaha ku jira Tiirarkan:** | **Ma Haysata xog aan dhammaystirnayn ama khaldan oo aan sharraxaad lahayn** | **Ka jawaab su'aasha laakiin ha bixin wax sharraxaad ah** | **Ka jawaab su'aasha, ku dar sharaxaad oo sax ah** | **Si fiican u soo bandhig, oo ku dar sharraxaad aad u fiican oo saxsanaan** | **Dhibcaha** |
| **Ku-Dridda Xubnaha Shaqaalaha ama Kordhinta Saacadaha Shaqaalaha** | A. Jawaabtu ma dhamaystirna, ama waxay tusinaysaa in shaqaalayntu aanay siin doonin daryeel la beegsaday ama taageero carruurta leh baahiyo culus. | A. Jawaabtu waxay sheegaysaa in shaqaalayntu ay siin doonto daryeel la beegsaday ama taageero carruurta leh baahiyo culus, laakiin aan lahayn sharraxaad dheeraad ah. | A. Jawaabtu waxay bixinaysaa ugu yaraan hal tusaale oo cad oo ah sida shaqaaluhu u caawin doonaan daryeelka ama u taageeri doonaan carruurta leh baahiyo culus. | A. Jawaabtu waxay bixisa hal ama in ka badan tusaale cad oo ku saabsan sida shaqaaluhu u caawin doonaan daryeelka ama u taageeri doonaan carruurta leh baahiyo culus. Jawaabta waxaa ku jira hal ama in ka badan tixraacyo cilmi-baaris ama qorsheyn hore. | A. /5 |
| | B. Jawaabtu ma muujinayso wax horumar ah oo xagga tayada daryeelka ah. | B. Jawaabtu waxay sheegaysaa in tayada daryeelka la horumarin doono, laakiin ma bixinayso tusaalayaal ku saabsan sida shaqaalaynta la codsaday ay taas ku gaadhi doonto. | B. Jawaabtu waxay bixinaysaa ugu yaraan hal tusaale oo cad oo ah sida shaqaaluhu u wanaajin doonaan tayada daryeelka. | B. Jawaabtu waxay bixinaysaa hal ama in ka badan tusaale cad oo ku saabsan sida shaqaaluhu u wanaajin doonaan tayada daryeelka. Jawaabta waxaa ku jira hal ama in ka badan tixraacyo cilmi-baaris hore ama qorsheyn sida shaqaaleysiinta la soo jeediyay ay u wanaajin karto tayada daryeelka. | B. /5 |
| | C. Kharashyada lama liis gareyn, ama si cad looma cadayn baahida shaqaale. | Kharashaadka shaqaalaynta ee la qiyaasay ayaa liiska ku jira, laakiin laguma darin codsiga sanduuqa ee marka hore la sheegay. | C. Kharashyada la qiyaasay ayaa si cad loo taxay waana isku mid codsiga sanduuqa ee marka hore la sheegay. Sharaxaada qaar waxaa ka mid ahaa. | C. Kharashyada la qiyaasay waxaa lagu caddeeyaa in la muujiyo ilo khuseeya iyo/ama isku xidhan, qiimaha saacadlaha ah, qiyaasaha xirfadlayaasha ama ilo kale oo la xaqiijin karo. | C. /5<br><br>Wadarta: /15 |

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

La cusbooneysiiyay: Oktoobar 12, 2023
Qaybta Barashada Hore
Waxaa oggolaaday Qaybinta Amy Russell, Ku-xigeenka Qaybta Barashada Hore

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| **Adeegyada daaweynta** | A. Jawaabtu ma dhamaystirna, ama waxay tusinaysaa in lacagtu aanay siin doonin daryeel la beegsaday ama taageero carruurta leh baahiyo culus. | J. Jawaabtu waxay tilmaamaysaa in lacaguhu ay siin doonaan daryeel la beegsaday ama taageero carruurta leh baahiyo culus, laakiin aan lahayn sharraxaad dheeraad ah. | A. Jawaabtu waxay bixinaysaa ugu yaraan hal tusaale oo cad oo ah sida lacagtu u beegsan doonto daryeelka/taageerada carruurta leh baahiyo culus. | A. Jawaabtu waxay bixisa hal ama in ka badan tusaale cad oo ah sida lacagtu u beegsan doonto daryeelka/taageerada carruurta leh baahiyo culus. Jawaabta waxaa ku jira tixraacyo cilmi-baaris hore ama qorsheyn hore. | A. /5 |
| | B. Jawaabtu ma muujinayso wax horumar ah oo xagga tayada daryeelka ah. | B. Jawaabtu waxay tilmaamaysaa in tayada daryeelka la horumarin doono, laakiin ma bixinayso tusaalayaal ku saabsan sida lacagtu u taageeri doonto tan. | B. Jawaabtu waxay bixinaysaa ugu yaraan hal tusaale oo cad oo ah sida maalgelintu u horumarinayso tayada daryeelka. | B. Jawaabtu waxay bixinaysaa hal ama in ka badan tusaale cad oo ku saabsan sida maaliyaddu u wanaajin doonto tayada daryeelka. Jawaabta waxaa ku jira tixraacyo cilmi baaris ah oo ku saabsan sida la soo jeediyay isticmaalka lacagaha ay u hagaajin karto tayada daryeelka. | B. /5 |
| | C. Kharashyada la qiyaasay lama liis gareyn, ama si cad uma aha adeegga daawaynta. | C. Kharashyada la qiyaasay ayaa liiska ku jira, laakiin wadarta cadadka la codsaday ma cadda. | C. Kharashyada la qiyaasay ayaa si cad loo taxay waana isku mid codsiga sanduuqa ee marka hore la sheegay. Sharaxaada qaar waxaa ka mid ahaa. | C. Jawaabtu waxay taxaysaa nooca gaarka ah ee adeegga daawaynta ee la codsaday. Kharashyada la qiyaasay waxaa lagu caddeeyaa in la muujiyo ilo khuseeya iyo/ama lasocato ciwaanka mareegaha, sicirka saacadii, qiyaasaha xirfadlayaasha ama ilo kale oo la xaqiijin karo. | C. /5<br><br>Wadarta: /15 |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| **Horumarinta Xarunta** | A. Jawaabtu ma dhamaystirna, ama shaqada lagu tilmaamay looguma talo gelin in la abuuro jawi daryeel ilmo oo sahlan. | A. Jawaabta waxay magacawday hagaajinta xarunta, laakiin ma jirto sharraxaad ama maclumaad shaqo oo la qoray. | A. Jawaabtu waxay qeexaysaa hagaajinta xarunta, waxayna sharraxaysaa shaqada loo baahan yahay in la qabto. | A. Jawaabtu waxa ay muujinaysaa qorshe shaqo oo si fiican looga fakaray, oo la baadhay si loo dhamaystiro horumarinta xarunta. | A. /5 |
| | B. Jawaabtu ma qeexayso u hoggaansanaanta sharciga dhaqdhaqaaqa naafada ADA ama baahiyaha dabeecadda. | B. Jawaabtu waxay sheegaysaa in shaqadu u hoggaansami doonto gelitaanka ADA, laakiin ma sharraxayso sida. | B. Jawaabtu waxay bixinaysaa ugu yaraan hal tusaale oo cad oo ku saabsan sida shaqadu u waafajin doonto dhaqdhaqaaqa naafada ADA ama baahiyaha dabeecadda. | B. Jawaabtu waxay bixisa hal ama in ka badan tusaale cad oo ku saabsan sida shaqadu u waafaqi doonto sharciga dhaqdhaqaaqa naafada ADA ama baahiyaha dabeecadda. Jawaabta waxaa ku jira tixraacyada cilmi-baarista ama shuruudaha ADA ee gaarka ah. | B. /5 |
| | C. Kharashyada la qiyaasay lama taxin, ama uma qeexayso hagaajinta xarunta. | C. Kharashyada la qiyaasay ayaa liiska ku jira, laakiin wadarta cadadka la codsaday ma cadda. | C. Kharashyada la qiyaasay ayaa si cad loo taxay waana isku mid codsiga sanduuqa ee marka hore la sheegay. Sharaxaada qaar waxaa ka mid ahaa. | C. Kharashyada la qiyaasay waxaa lagu caddeeyaa in la muujiyo ilo khuseeya iyo/ama isku xidhan, qiimaha saacadlaha ah, qiyaasaha xirfadlayaasha ama ilo kale oo la xaqiijin karo. | C. /5<br><br>Wadarta: /15 |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| **Qalabka iyo taageerada iyo la qabsiga** | A. Sanduuqa waxa lagu calaamadeeyay "maya". | N/A | N/A | A. Sanduuqa waxa lagu calaamadeeyay "haa." | A. /5 |
| | B. Jawaabtu ma taxin walxaha abuuri doona goob taageero badan leh. | B. Jawaabtu waxay taxday waxyaabaha abuuri doona goob taageero badan, laakiin ma sharaxin sida. | B. Jawaabtu waxay bixinaysaa ugu yaraan hal tusaale oo cad oo ah sida alaabtu u abuuri doonto goob taageero badan leh. | B. Jawaabtu waxay caddaysaa sida alaabtu u abuuri doonto goob taageero badan iyadoo la adeegsanayo sharraxaadyo waaweyn. Jawaabta waxaa ku jira tixraacyo cilmi-baaris hore ama qorsheyn hore. | B. /5 |
| | C. Kharashyada la qiyaasay lama taxin, ama si cad maaha agabka iyo qalabka taageeradu. | C. Kharashyada la qiyaasay ayaa liiska ku jira, laakiin wadarta cadadka la codsaday ma cadda. | C. Kharashyada la qiyaasay ayaa si cad loo taxay waana isku mid codsiga sanduuqa ee marka hore la sheegay. Sharaxaada qaar waxaa ka mid ahaa. | C. Kharashyada la qiyaasay waxaa lagu caddeeyaa in la muujiyo ilo khuseeya iyo/ama isku xidhan, qiimaha saacadlaha ah, qiyaasaha xirfadlayaasha ama ilo kale oo la xaqiijin karo. | C. /5<br><br>Wadarta: /15 |
| **Celceliska Dhibcaha** | | | | | /15 |
| **Dhibcaha Gunnada** | | | | Bixiyahu wuxu ku yaal lamadegaan uu adag yahay Helitanka Xannaanada Carruurtu*<br><br>Bixiyaha u adeegaya ama ku dhex jira bulshada la takooro, leh dakhliga hoose* | /5<br><br>/5 |
| **Wadarta dhibcaha** | | | | | Wadarta: |